



Waalidiinta

Sida tan yeel/samee xagga faduusha iyo xoogsheegashada

Fiiro gaar ah u yeelo xagga xaaladda dareenka ilmahaaga iyo **isbeddellada** ku dhaca hab dhaqankooda.

Si dhaqso leh u ogeeysii dugsiga, haddii aad ogaato ama aad heshid macluumaad ku saabsan ilmahaaga ama caruurta kale xagga arrimaha faduusha iyo xoogsheegashada.

Waad soo wargelin kartaa, **sidoo kale waqtiga firaaqada dhacdooyinka dhaca** faduusha iyo xoogsheegashada, haddii aad u maleeyneyso, in aay saameyn ku leedahay iskuulka ilmahaaga. Sidoo kale, kala hadal waalidiinta kale dhacdooyinka ku lugta leh.

Xataa haddii aad ka walwalsan tahay ilmahaaga, **isku day in aad ka fekerto sida habboon ee arrinka loo xallin karo** iyo sidoo kale aragtida ilmaha kale ee ku lugta leh arrinka.

Haddii ilmahaaga la faduulsho oo loo xoogsheegto, **taageer asaga**. Ku dhiirigeli in uu sheego waxyaabihii kala soo gudboonaaday, iyadoo arrinka lagu lafogurayo dugsiga.

Haddii ilmahaaga uu ku lug yeesho faduul ama xoogsheegasho, ka caawi asaga ama ayada, waana in arrinta lala lafoguro macallimiinta iyo ilmaha kale ee xaaladda ku lugta leh.

Waad ka hortagi kartaa faduusha iyo xoogsheegashada oo raac tallaabooyinka kan:

Kala hadal ilmahaaga hadba qaabka faduusha iyo xoogsheegashada, iyo sidoo kale xiriirka kala dhexeeya saaxiibada dugsiga, xilliga firaaqada iyo xagga goobaha dhigitalka.

Wax ka baro dhijitalka iyo warbaahinta arrimaha bulshada, ee ilmahaagu aay isticmaalaan.

Leeylis si wadajir ah ula samee ilmahaaga xagga xirfadaha warbaahinta iyo tan isticmaalka internetka iyo barnaamijyada si loogu isticmaalo isticmaal kooban. **Xadid** haddii loo baahdo waqtiga internetka ee ilmaha. **Bar** sida habboon ee saaxiibtinimada ku dhisan ee internetka loogu dhaqmo ama looga macaamiloodo.

Miyaad ogeyd, in :

Ilmahaagu waxuu **xaq u leeyahay adeeyo cilmi nafsi ah, daryeel caafimaad bulsho iyo daryeelka caafimaadka dugsiga**.

Khobarada adeegyada waxeey bixiyaan oo hagitaan siiyaan waalidiinta.

Adiga waxaad **xaq u leedahay, in aad heshid macluumaadyada** ilmahaaga ku saabsan ee xagga arrimaha dugsiga iyo arrimaha bedqabka dugsiga.

Haddii faduusha iyo xoogsheegashadu aay horseed u noqoto **tallaabooyin edbin ama farageli ah amaba fal dambiyeed ciqaab mudata ayaa la muteeysan karaa**, haddaba waxaa la raacayaa dhageeysiga dhinacyada iyo habraacyada sharcigu farayo, waana in lagu wargeliyo dadyowga masuulka ah iyo waalidka.